



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA

Summad: MDWAD/974/2022

TR. 17/09/2022

UJEEDO:- SUGITAAN DHAXALKOOB, CADEYN TARIKO IYO WAKAALADO

Maanta oo ay taariikhdu tahay 17/09/2022, Waxaa maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

1-Geelle Cabdi Axmed, Somali ah, Ku Dhashay Ceerigaabo, Sanadkii 1968, Ina Khadiijo Yuusuf Cali, sita Somali Driving License No.19010.

2-Jaamac Maxamed Faarax, Somali ah, Ku Dhashay Laascaanood, Sanadkii 1966, Ina Faadumo Sh.Maxamed Axmed, sita Somali Driving License No.63326.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga Caddeeyeen in uu geeriyooday Marxuum la oran jiray **Maxamed Xirsi Ciise**, kuna geeriyooday **Dubai** Sanadkii: **2012**, labadiisa waalidna way ka geeri Horeeyeen, Wuxuuna ifka uga tagay oo dhaxlaya **1- Xaas, 2-, Wiil iyo 2-, Gabdhoo** Waxayna kala yihiin sidan soo socota: -

DADKA:-

1-Siraad	Xasan	Xuseen	Degan UAE	Dhalatay 1942	(Xaaskii Marxuumka)
2-Rashid	Maxamed	Xirsi	Degan Canada	Dhashay 1962	(Wiilkii Marxuumka)
3-Bashir	Maxamed	Xirsi	Degan UK	Dhashay 1963	(Wiilkii Marxuumka)
4-Nasra	Maxamed	Xirsi	Degan UK	Dhalatay 1976	(Gabadhii Marxuumka)
5-Aamina	Maxamed	Xirsi	Degan UAE	Dhalatay 1960	(Gabadhii Marxuumka)

HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXMUUMKA.

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in **Marxuum MAXAMED XIRSI CIISE** uu ifka uga tagay guri villo ah oo ku yaalla **Muqdisho** Degmada **HODAN**, Cabirkiisuna yahay **12X12-M**, Lehna W.M.L 1012/76, Tr. 05/06/1976, kana soo baxday Maxkamadda Degmada Xamar Qeybta Macaamilka, ayna wada saxiixeen Kaaliye: Sh.Xasan Xaaji Samatar, iyo Garsoore: Sh.Maxamuud Sh.Maxamed.


WAKAALADO.

- Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa in dhaxaltooyada kala ah **1-Bashiir Maxamed Xirsi, 2-Nasra Maxamed Xirsi, 3-Rashiid Maxamed Xirsi**, ay soo wakiisheen **Aamina Maxamed Xirsi**, sida ku cad **A-Warqad Wakaalad Gaar ah (Qeyb dhaxaleed)**, TIX: NBDUKB3/2440/2022, Tr. 06/09/2022, kana soo baxday Nootaayo Benadir-Danuun, uuna saxiixay Dr. Yonis Abdirahman Mohamud (Timacadde), **B-Warqad Wakaalad Gaar ah Rep No. W-22-101**, Tr. 06/09/2022, kana soo baxday Medina legal Services, uuna saxiixay Omar Mohamoud Mohamed, lehna Warqad Damaanad Rep No. 83045/MPN/2022, Tr. 17/09/2022, kana soo baxday Nootaayo Muqdisho, Dr. Saciid Cali Cosoble, Sidoo kale **4-Siraad Xasan Xuseen**, kana mid ah dhaxaltooyada, waxay maxkamadda ku hor wakiilatay gabadheeda **Aamina Maxamed Xirsi**, dhammaan dhaxaltooyada sare ku xusan waxay u soo wakiisheen **Aamina Maxamed Xirsi**, in ay u maamuli Karto, dhaxalkoob u samayn Karto, xafidi Karto, gadi Karto, Hibeyn Karto, Wareejin Karto, waqfi karto, Qofkasta Qismigiisa Ku Wareejin Karto, dhisi Karto, kireyn Karto, ka saari Karto, Saxiixi Karto kaalintooda, una doodi Karto una dacwoon Karto oo qareen u qaban Karto, Maxkamadaha dalka hortooda u matali Karto qismiga uu ku leeyihiin dhammaan hantida dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen **Marxuum Maxamed Xirsi Ciise**.




MASAWIRADA MARKHAATIYAASHA

1)- GEELLE CABDI AXMED



2)- JAAMAC MAXAMED FAARAX



DAMIINU MAAL

- **Geelle Cabdi Axmed & Jaamac Maxamed Faarax**, Waxay Maxkamadda Ka Hor Cadeeyeen in ay Damiinul Maal Buuxa ka Yihiin, Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Sare Ku Xusan Hadii ay Dhacdo in ay Qariyaan Qof Ka Mid ah Dhaxaltooyada ama ay noqon waayaan dadka sare ku xusan Dhaxaltooyadi dhabta ahaa, Masuul Buuxana ay Ka Yihiin Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Wakaaladaha Sare Ku Xusan Soo diray.

=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1- GEELLE CABDI AXMED

2- JAAMAC MAXAMED FAARAX

SAXIIXA QOF KAMIDA DHAXALTOOYADA

1- SIRAAD XASAN XUSEEN

SAXIIXA WAKIILKA GUUD EE DHAXALTOOYADA

2- AAMINA MAXAMED XIRSI

SUGITAANKA MAXKAMADDA.

Maxkamadda Markay aragtay Codsiga dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka Markhaatiyaasha, Markay aragtay Dukumintiga guriga uu Marxuumku ku qoran yahay, markay aragtay wakaaladaha sare ku xusan, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir sugeysaa geerida **Marxuum Maxamed Xirsi Ciise**, oo ay Dhaxalkiisu leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, waxay kaloo maxkamadda Degmada Wadajir Sugeysaa in Dhammaan Dhaxaltooyada Marxuumka ay soo wada wakiisheen **Aamina Maxamed Xirsi**, oo dhaxaltooyada ka mid ah, waana sugitaan dhaxalkoob, iyo Wakaalado ansax ah oo waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

KAALIYAHA MAXKAMADDA.

C/risaaq Cali Cabdi "Caabi"

GARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR.

Dr. Axmed Maxamed Cali



